



Total Rainfall (mm) for 02-09 May 2023



Exeptional Rainfall for 02-09 May 2023



May 02, 2023

Saadaasha Roobabka Xilliga Gu'ga (02^{da} - 09^{ka} May) - 2023

- Todobada casho ee soo socota oo ah **asbuuca ugu horeeya ee Bisha May 2023ka** waxay saadaashu **roobka xiliga Gu'ga** muujinaysaa **in roob xoogan ka di'i doonaan** qaar ka mid ah gobollada dalka Sida; **Awdal, waqooyi-galbeed, Sool, Sanaag, Togdheer, Bari, Nugaal, Mudug, Galgaduud, Hiiraan, Shabeelada-Dhaxe, Banaadir, Shabeelada-Hoose, Jubad-dhaxe** iyo **Jubada-Hoose** sida saadaashu sheegayso waxay helidoonaan **roobab fiican** oo cabirkoodu gaarayo **50 illaa 150 (mm)**.
- Degmooyin ka mid ah gobolada: **Bari, Bay, Awdal, Gedo, Jubada-Hoose, Jubada-Dhaxe, Jubada-Hoose** iyo **qeybo kamid ah degmooyinka Gobalka Banaadir** ayaa waxaa la saadaalinayaa in ay ka da'aan roobab cabirkooddu u dhaxeeyo **10 ilaa 30 mm**.
- Degmooyin ka mid ah gobalada aan kor ku soo xusnay waxay saadaashu sheegaysaa in ay dadka degan deegaanadaas ay wajihi doonaan **daadad iyo Fatahaado (Flood and Flash floods)**.
- Waxaa sare u soo kacaya **heerka biyaha wabiga Shabeele** taasina waxaa sabab u ah **roobabka xoogan ee ka da'aya qeybo ka mid ah dalka iyo buuralayda Ethiopia**.
- Hadii roobabka la filyo todobaadkaan **ay u da'aan sida saadaashu sheegeeyso**, waxay geeysan karaan **khasaare** ka dhasha **fatahaado** iyo **daadad** saameeyana naf iyo maalba.

FARIIMO DIGININ AH



Waxaa **looga digayaa** bulshada ku nool **Gobalada kor ku xusan** iyo **Wabiga hareerhiisa in ay aad ugu feejignadaan** saameynta roobku ku yeelan karo **naftooda** iyo **Hantidoodaba**.



Waxaa sidoo kale **looga digayaa** bulshooyinka ku nool gobaladaas **in ay iska ilaaliyaan togaga biyuhu maraan** xiliga roobku da'ayo, taas oo khatar galin karta naftooda.



Sidookale Waxaa guud ahaan Bulshada Soomaaliyeed **looga digayaa in aysan degaameeyn ama guryo ka dhisan meelaha biyo mareenka ah** si ay ugu badbaado naftooda iyo Hantidoodaba.

TALA BIXIN



Bulshooyinka **miyiga dagan** waxaa talo lagu siinayaa **in ay keeydsadaan biyaha roobku dhigo**, si ay u isticmaalaan maalmaha qaleeylk ah iyo **sidoo kale in ay iska kar-kariyaan biyaha inteeysan cabin**



Waxaa Bulshooyinka ku dhaqan **wabiga hareerhiisa** iyo **meelaha biyo mareenka ah** lagula talinayaa **in ay caratuur iyo wixii ay helikaraan iskaga buuxiyaan meelaha uu wabigu ka jilicsanyahay** si loo yareeyo saameynta **khatarta fatahaada**.

Hay'adda maareynta musiibooyinka Qaranka - SoDMA

Xarunta ka digista Halis-wadareedka

Muqdisho - Soomaaliya



Communications@sodma.gov.so



www.sodma.gov.so

